HESHIISKA

CAALAMIGA AH EE

XUQUUQDA DADKA

NAAFADA AH

The United Nations Convention on the Rights of Persons with Disabilities

Translated into Somali by: **Disability Action Network (DAN)**

Big scale reprinting and dissemination kindly Sponsored by:

Australian Government

AusAID

The Translation into Somali was first funded by ABILIS Foundation, in Finland.

MAHAD NAQ

Allah ayaa Mahad oo dhan leh!

Intaas kaddib Hay'adda Disability Action Network (DAN) oo ah hay'ad Waddani ah oo dalka Somaliland gobolladiisa kala duwan iyo degmooyinkaba ka hawlgasha, waxay mahad naq ballaadhan u soo jeedinaysaa dhammaan dadkii gacanta ka geystay sidii ay midho dhal u noqon lahayd hawshan baaxadda leh ee ah in Afka Somaliga loo turjumo documentiga Heshiiskan Caalamiga ah ee Xuquuqda Dadka Naafada ah oo uu Golaha loo dhan yahay ee Jimciyadda Quruumaha ka Dhexaysaa Ansixiyey Bishii Diisember, 2006dii.

Intaas kaddib, waxaan halkan mahad-naq ballaadhan uga gudbinaynaa Haya'adda Caawimada u qaabilsan wadanka **Australia** ee **AusAID** oo maalgelisay dib u daabicidda iyo in nuqullo tiro badan oo Af-Somali ah laga sameeyo oo la qaybiyo heshiiskan. Maal-gelintaas oo DAN loo soo mariyey Safaaradda Australia ku leedahay magaalada Nayrobi ee dalka Kenya.

Waxaan kale oo u mahadnaqaynaa Hay'adda Caalamiga ah ee ABILIS Foundation, ee Waddanka Finland oo maalgelisay hawshii hore ee Tarjumadda Heshiiskan Caalamiga ah ee Xuquuqda Dadka Naafada ah oo qayb ka ahaa mashruuc ku saabsanaa Kor u qaadidda Xuquuqda Dadka Naafada ah ee Somaliland.

Waxa Kale oo Hay'adda DAN ay u Mahadnaqaysaa aqoonyahannadii iyo shaqsiyaadkii hawshan Tarjumadda Heshiiskan lafaguray ee waqtiga iyo dedaalka geliyey si ay u noqoto hawal midho dhal ah, iyadoo tarjumadda documentigan farsamo aanay ahayn hawl fudud.

Shaqsiyaaadka tajumaddan sameeyey oo kala ah:

1. Cali Jaamac Xasan
2. Cabdikarim Maxamud Sh. Muse
3. Mohamud Yusuf Ismail (Garaaad)
4. Mohamed Aden Ducaale
5. Ismaaciil Cabdi Yonis
6. Fathia Cabdillahi Maxamed
7. Maxamed Yusuf Cismaan
8. Ayaan Xasan Raabbi
9. Abwaanka Saleebaan Carab Aw Siciid

Ugu dambayn, waxaannu rajeynaynaa in Heshiiskan Xuquuqda Dadka Naafada oo ku qoran Afka Somaliga uu wax weyn ka tari doono fahamka iyo kor u qaadidda xuquuqda iyo nolosha dadka naafada ah ee Somaliland iyo dhammaan dalalka lagaga hadlo Afka Somaliga ee Geeska Afrika iyo dunida kaleba.

Waxaannuna leenahay “Fartii Qalaad ha moodine, Carrab ku Qaldi maayee, Sidii Caanaha Qudhqudhiya”

Waxaannu raalli gelin buuxda ka bixinaynaa wixii aad saluugtaan ee ka yimaadda tarjumadda aannu ku samaynay heshiiskan Xuquuqda Dadka Naafada ah, xagga eray bixinta ama xagga qoraalka iyo fahamka guud.

Documentiga asalka ahi waa kan ku qoran Afka Ingiriisiga oo ku lifaaqan buuggan Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dadka Naafada ah, haddii ay wax is khilaaf ahi ka soo baxaan tarjumaddan

HORDHAC

Macluumaadka buuggani xambaarsan yahay waa qoraalkii heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda dadka naafada ah oo lagu qoray luqad si fudud loo fahmi karo.

Qoraalka heshiiskan caalamiga ah oo dhamaystiran kuna qoran afka Ingiriisiga waxaa laga heli karaa oo kale websitekan:

http://www.un.org/esa/socdev/enable/rights/convtexte.htm

GOGOLDHIG

1. Qoraallada aasaasiga ah ee saldhigga u ah Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysa waxay caddeeyeen in aynu dhammaan simanahay kana wada tirsanahay qoys qudha oo bani'aadmi ah. Taasina waxay muhiim u tahay xorriyadda, Caddaaladda iyo nabad gelyada Adduunka.

2. Dhammaan waynu simanahay waxaynuna leenahay xuquuq bani'aadam oo isku mid ah.

3. Waxaynu isku waafaqsanahay in ay lama huraan tahay in dadka naafada ahi helaan dhammaan xuquuqdooda aadaminimo iyo xorriyaddooda oo buuxda iyo inaan sinaba loo takoorin.

4. Waxaa jira todoba heshiis oo kale oo caalami ah kuwaas oo xaqiijinaya isla markaana ilaalinaya xuquuqda aadamiga guud ahaan (eeg lifaaqa)

5. Waxaynu ognahay in Naafanimadu tahay waxaan joogto ahayn oo isbed-beddesha iyadoo ay tahay degaanka iyo habdhaqanka dadka waxa abuura naafannimada.

6. Waxaa lagama maarmaan ah in la xasuusnaado waxa ay qaraarka qaramada midoobay ee sheegaya in dadka naafada ahi ay helaan fursado la mida kuwa dadka kale iyo barnaamijka howlgalka caalamiga ah ee ku wajahan wax la qabadka naafadu ku dedaalayaan inay fuliyaan, marka ay dejinayaan shuruucda, qawaaniinta, go'aamada, barnaamijyada iyo waxqabadka oo ah inay dhammaan ahaadaan kuwo si fiican ugu adeegaya dadka naafada ah.

7. Waxaa aad u muhiima in la xaqiijiyo in xaaladda dadka naafada ah la siiyo tixgelin la mid ah ta dadka kale markasta oo dawladaha iyo ururada caalamiga ahi qorshaynayaan horumarinta wadan; tusaale ahaan qorshayaasha la dagaalanka saboolnimada ama shaqo abuurista.

8. Waxaynu ogsoonahay marka uu qof ku takooro qof kale naafannimo in qofkaasi ka xayuubiyay sharaftii iyo milgihii bani'aadamnimo ee qofkaasi lahaa.

9. Waxa kaloo aynu ogsoonahay in ay jiraan kala duwanaansho iyo farqi u dhexeeya dadka naafada ah iyo noocyo badan oo naafannimo ah.

10. Waxaa kalaynu ogsoonahay inay lama huraan tahay in dhammaan dadka naafada ahi ay helaan xuquuqdooda iyadoo ay ku jiraan naafada u baahan taageero dheeraada.

11. Waxaa walaac inagu haya in dadka naafada ah weli xuquuqdoodii la duudsiyayo xataa iyadoo ay jiraan heshiisyo ilaaliya xuquuqdooda.

12. Waxaa kaloo aynu ogsoonahay in ay muhiim tahay in waddamadu si wada jir ah isaga kaashadaan si nolosha dadka naafada ah loo wanaajiyo gaar ahaan wadamada saboolka ah.

13. Waxaynu ogsoonahay in dadka naafada ahi ay qayb laxaad leh ka qaataan horumarka dalalkooda haddii si buuxda looga qayb geliyo xuquuqdoodana la siiyo.

14. Waxaa kaloo aynu ogsoonahay in ay lagama maarmaan tahay in dadka naafada ahi ay u madaxbanaanaadaan go'aaminta masiirkooda.

15. Waxaynu rumaysanahay in ay lama huraan tahay in dadka naafada ahi ka qayb qaataan dejinta qorshayaasha iyo barnaamijyada dalalkooda gaar ahaan kuwa iyaga tooska u khuseeya.

16. Waxaa walaac leh in aan dadka naafada ah kaliyo lagu takoorin naafannimadooda ee weliba lagu takooro jinsiyaddooda, nasabiyadooda, iyo siyaabo kaloo badan.

17. Waxaynu ogsoonahay in marar badan haweenka iyo hablaha yar yar ee naafada ah si xun loola dhaqmo, la garaaco, dhaawacyo loo geysto ama la hagardaameeyo.

18. Waxaynu ogsoonahay in carruurta naafada ahi leeyihiin xuquuq la mid ah dhammaan carruurta kale, isla markaana ay dabbaqayaan heshiisyada caalamiga ah ee ku saabsan xuquuqda carruurta.

19. Waxaa kale oo aad u muhiim ah in xaaladda ragga iyo dumarka naafada ah tixgelin la siiyo markasta iyo wax kasta oo waddan ka qabanayo xuquuqda dadka naafada ah.

20. Waxaa kaloo muhiim ah in la xusuusnaado in badanka dadka naafada ahi sabool yihiin, arrintaasoo lama huraan ka dhigaysa in la ogaado raadka ay taasi ku leedahay noloshooda.

21. Waxaynu xusuusanahay inay lagama maarmaan tahay in la helo nabad gelyo iyo amni si loo hubiyo in dadka naafada ahi helayaan xuquuqdoodii, gaar ahaan kuwa ku nool goobaha dagaalada ama wadamada aan dawladaha lahayn.

22. Waxaynu ogsoonahay muhiimada ay u leedahay dadka naafada ah inay helaan daryeelka nolosha ee dhan walba ah, sida daryeel caafimaad, waxbarasho, macluumaadka iyo xogaha ay u baahan yihiin si ay u doonan karaan xuquuqdooda.

23. Waxaynu ognahay in qof kasta xil ka saran yahay inuu hubiyo in qofkasta oo kale helayo xuquuqdiisa.

24. Waxaynu aaminsanahay in qoysku yahay xubinta gundhigga u ah bulshada iyo in dadka naafada ah iyo qoosaskooduba helaan ilaalinta iyo gargaarka ay u baahan yihiin si ay u awoodaan inay doontaan xuquuqdooda.

25. Waxaan rumaysanahay in heshiis koobaya dhinacyada kala duwan ee nolosha uu wax weyn ka tari karo wanaajinta nolosha dadka naafada ah iyo hubinta in dadka naafada ah loola dhaqmo si aan takoor lahayn si simanna ay uga qayb qaataan nolosha dhinacyadeeda kala duwan, ha ahaato wadamada saboolka ah iyo kuwa qaniga ahba.

Dhammaan sababaha aan kor ku soo sheegnay awgood, wadamada danaynaya inay ka mid noqdaan heshiiskani waxay oggolaadeen qodobadan soo socda:

Qodobka 1aad

Ujeeddada

Sababta heshiiskan loo sameeyay waa in la xaqiijiyo in wadamada oggolaaday heshiiskani ay hubiyaan:

- In dhammaan xuquuqda bani'aadamka iyo xorriyadaha dadka naafada ahi leeyihiin ay helaan isla markaana kor loo qaado lana ilaaliyo.
- In la qadariyo sharafta dadka naafada ah.

Dadka naafada ah waxaa ku jira kuwo leh naafanimo culus, tusaale ahaan, naafanimo jidheed, mid bulsheed, mid garaad kuwaas oon awoodin inay ka qayb qaataan bulshada sababo kala duwan dartood, sida dhaqanka, luqadda, jaranjarooyinka iyo shuruucda oo ka horjoogsanaya dadka naafada ah inay bulshada ka qayb noqdaan.

Qodobka 2aad

Qeexitaanada

“Wada xidhiidh” (Communication) – Micnaheedu waxa weeye siyaabaha kala duwan ee loo xidhiidho si dadka oo dhami afkaar iyo aaraa isu waydaarsadaan. Tusaale ahaan, hadalka, faro ku wada hadal (ee dadka aan wax maqlin), qoraalka, Braille-ka (Farta dadka aan wax arkin akhriyaan), taabashada, daabacaadda farta waawayn, qoraalka, maqalka, luqad fudud, baraarujiye wax u sheega iyo siyaabaha kale ee dadka naafada ahi u wada xidhiidhaan.

“Af” (Language) – micnaheedu waxaa weeye luqadaha kala duwan ee hadalka, calaamadaha iyo noocyada kale ee aan hadalka ahayn.

“Takoor ku salaysan naafanimo (discrimination on the basis of disability) – marka dadka laga saaro, laga sooco ama layska hortaago waxqabad naafannimadooda darteed. Tani waxay khusayn kartaa nolosha qaybaheeda oo dhan.

“Goob ku habboon” (Reasonable Accommodation) – micnaheedu waxa weeye in qofku u baahan karo in lagu sameeyo isbedelo bay’addooda, kuwaasoo u fududeeynaya noloshooda tusaale ahaan, gurigooda, ama goobta shaqada si ay u helaan xuquuqdooda. Haddii tani qaali noqoto ama adkaato samayteedu markaa isbeddeladaa waa layska daynayaa.

“Jaangoyn cid kasta u adeegaysa” – micnaheedu waa in wax kasta loo sameeyo, qorsheeyo, abuuro iyo in goobkasta loogu talo galo isticmaalka dadka naafada ah. Mararka qaarkood waxa dhici karta in qof naafanimo gaara lihi u baahdo in loo sameeyo adeeg gaara si uu u helo xuquuqdiisa.

Qodobka 3aad

Mabaadii’da guud

Heshiiskani wuxuu ku saabsan yahay:

- Sharafta
- Lahaanshaha awood doorasho.
- Isku fillaan
- Takoorid la’aan
- Ka qayb gal
- Ka mid noqosho buuxda
- Ixtiraamka kala duwanaanshaha
- Fahamka in naafanimadu qayb ka tahay nolol maalmeedka
- Fursado Siman
- Xanibaad la’aan
- Sinaanshaha raga iyo haweenka
- Ixtiraamka carruurta

Qodobka 4aad

Waajibaadka Guud.

1. Waxay waddamadu ballan qaadayaan in ay hubiyaan in xuquuqda aadamiga lagu dabbaqo dadka oo dhan, iyadoon lagu takoorayn cidna naafannimadooda. Si loo oofiyo ballanqaadkaas, waddamadu waxay:

B) Qaadayaan tallaabo kasta oo lagu hubinayo in xuquuqaha heshiiskan ku qoran loo beddelo shuruuc, qarshayaal isla markaana lagaga dhaqmo wadankaas.

T) Qaadayaan talaabooyin: tusaale ahaan, inay sameeyaan shuruuc iyo qawaaniin, isla markaana bedelaan qawaaniintii iyo shuruucdii hore ee gabawday ee aan la jaanqaadayn heshiiskan, iyadoo meesha laga saarayo wixii shuruuc kale ah ama hab dhaqan ah ee takooraya dadka naafada ah.

J) Xaqiijinayaan in xuquuqda bani'aadamka ee dadka naafada ahi ay qayb ka yihiin nidaamka iyo mashaariicda dalalkooda.

X) Ballanqadayaan Inaanay u dhaqmin si ka soo horjeeda Heshiiskan iyo inay xaqiijiyaan in cid kasta oo kale ixtiraamaan Heshiiska.

Kh) Qaadayaan tallaabo kasta oo lagu horjoogsanayo shakhsiyaadka, ururada, ama hantiilayaasha gaarka ah inaanay qofna ku takooraan naafanimadiisa.

D) U hawlgelayaan, dhiirrigeliynayaana isticmaalka alaabta, adeegyada, qalabka iyo imkaaniyaadka kuwaasoo ay isticmaali karaan dhammaan dadka naafada ah ee adduunyada oo dhan, iyadoo qofka ugu kacaysa qiimaha ugu hooseeya ee macquulka ah.

R) U hawlgelayaan, dhiirrigelinayaana farsamooyinka casriga ah ee dadka naafada ah ka caawin kara qaybaha kala duwan ee nolosha, gaar ahaan kuwa aan qaaliga ahayn.

s) Oggolaanayaan In lagu wargeliyo dadka naafada ah noocyada adeegyada jira oo dhan, sida teknolojiyadda cusub, iyo noocyada kale ee taakulo iyadoo loogu gudbinayo qaab ay fahmi karaan dadka naafada ahi.

Sh) Ku tababaryaan dadka naafada ah xuquuqaha uu heshiiskani dhigayo si loo xaqiijiyo in la hagaajiyo wada shaqaynta ay la leeyihiin dadka naafada ah.

2. Hirgelin doonaan qawaaniin iyo shuruuc la xidhiidha xuquuqda xagga dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka ee ay jidaynayaan, intii awooddooda iyo hayntoodu u saamaxayso, haddii ay lagama maarmaan noqoto waxay iskakaashan karaan waddamo kale sidii xuquuqahan loo fulin lahaa. Laakiin wixii karaankooda ah waa inay toos u fuliyaan.

3. Marka heshiiskan qawaaniin iyo shuruuc loo beddelaayo, waddamadu waa in ay ku daraan oo ay ka qayb geliyaan dadka naafada ah oo ay ku jiraan carruurta naafada ah, iyadoo loo marayo ururada iyaga ka wakiilka ah.

4. Heshiiskani waxba uma dhimayo qawaaniinta iyo shuruucdii hore u jirtay ee u wanaagsanaa xuquuqda dadka naafada ah. Waddamadu waa inaanay marmarsiinyo heshiiskan uga dhigan si aanay u fulin xuquuqo hore u jiray.

5. Heshiiskani waxaa lagu dabaqayaa waddanka oo dhan.

Qodobka 5aad

Sinaanshaha iyo Takoorid la'aanta.

1. Waddamadu waxay oggolaadeen in dadka naafada ahi ay sharciga ula siman yihiin dadka kale sharciguna uu ka ilaalinayo wixii faquuq ah.

2. Waddamadu waxay oggolaadeen inaan la aqbalin in dadka lagu dirsooco naafanimadooda haddii ay jiraan wax takoorid ahina la joojindoono.

3. Waddamadu waxay qaadi doonaan wixii tallaabo ah ee ay ku xaqiijinayaan haddii qof naafa ahi u baahan yahay isbeddel lagu sameeyo deegaankiisa si uu u helo xuquuqdiisa, markaa waa in isbedelkaa la sameeyaa.

4. Tallaabooyin gaara, ama tallaabooyinka wax qabad ee ay u baahan yihiin dadka naafada ahi si ay ula sinnaadaan dadka kale waa la oggolyahay. Tallaabooyinkan gaarka ahina takoor kuma noqonayaan dadka aan naafada ahayn.

Qodobka 6aad

Haweenka Naafada ah.

Waddamadu waxay oggolaadeen in:

1. Haweeenka iyo gabdhaha naafada ahi ay la kulmaan nooc kasta oo takoorid ah. Waddamadu waxay xaqiijin doonaan inay gabdhaha iyo haweenka naafada ahi ay u helaan si buuxda oo loo siman yahay xuquuqdooda iyo xorriyaadkooda.

2. Ay qaadaan tallaabooyin lagu hor marinayo laguna awood siinayo dumarka naafada ah iyodoo la damaanad qaadayo in dumarkaasi helaan xuquuqdooda.

Qodobka 7aad

Carruurta Naafada ah.

Waddamadu waxay:

1. Xaqiijin doonaan in carruurta naafada ahi leeyihiin xuquuq la mid ah ta carruurta kale.

2. Xaqiijin doonaan in markastoo ay qabanayaan wax ubadka khuseeya in muhuumidda la siiyo waxa ilmaha u danta ah.

3. Xaqiijin doonaan in carruurta naafada ahi ay xaq u leeyihiin inay muujiyaan fekerkooda, isla markaana la tixgeliyo aaraadooda. In la xaqiijiyo in carruurta naafada ah laga caawiyo inay soo gudbiyaan fekerkooda.

Qodobka 8aad

Wacyi gelin

1. Waddamadu waxay oggolaadeen in si deg dega ah ay:

B) Uga caawin doonaan qoysaska iyo bulshada oo dhan ku wacyi gelinta dhibaatooyinka soo waajaha dadka naafada ah. Waxay ka howl geli doonaan sidii loo xaqiijin lahaa in xuquuqda iyo sharafta dadka naafada ah la tixgeliyo.

T) Ula dagaalamaan afkaaraha khaldan ee iinta loogu yeelayo dadka naafada ah.

J) Ugu wacyi gelin doonaan bulshada kartida iyo wax qabadka dadka naafda ah iyo inay ka qayb qaadan karaan horumarka waddanka.

2. Waddamadu waxa kaloo:

B) Ay samayn doonaan wacyi gelin bulsho oo ku saabsan xuquuqda dadka naafada ah si:

I. Loo muujiyo in dadka naafada ahi leeyihiin xuquuq la mid ah ta dadka aan naafada ahayn.

II. Loogu iftiimiyo bulshada arimaha naafada iyo in la beddelo khaladaadka laga fahamsan yahay naafannimada.

III. Loo muujiyo sida ay dadka naafada ahi u caawin karaan in la horumariyo goobaha shaqada.

T) in dugsiyada iyo goobaha kale ee waxbarasho loogu dhigo ardayda ixtiraamka xuquuqda dadka naafada ah.

J) In Warbaahinta (Sida Raadiyaha, televisionka, warsidayaasha iwm) lagu dhiirrigeliyo inay soo bandhigaan muuqaalo lagu kobcinayo xuquuqda dadka naafada ah.

X) Kor loogu qaado mashaariic tababaro ah kuwaasoo bulshada ka caawin doona sidii ay u ogaan lahaayeen xuquuqda dadka naafada ah.

Qodobka 9aad

Caqabad la'aan

1. Dalalku waxay baabi'in doonaan dhammaan caqabadaha dadka naafada ah ka haysta dhismayaasha, waddooyinka, gaadiidka, hellidda xogaha, war is gaarsiinta, iyo adeegyada miyi iyo magalaba. Habkani wuxuu dadka naafada ah u suurto gelinayaa in dadka naafada ahi ku noolaan karaan nolol aan cidna ku tiirsanayn oo dhamaystiran. Dalalku waxay samayn doonan xeerar ay ku dhaqmi doonaan oo khuseeya:

   B) Dhismayaasha, waddooyinka, gaadiidka, iyo gudo iyo dibedba, tusaale ahaan, Dugsiyada, Guryaha, Isbitaalada, Xarumaha Caafimaadka, iyo Goobaha Shaqada.

   T) Hellida xogaha, war isgaadhsiinta, iyo waxyaabaha kale sida, adeegyada technologiyadda casriga ah iyo gargaarka caafimaad ee deg degga ah.

2. Waddamadu waxay kaloo ku tallaabsanayaan in:

   B) Ay sameeyaan, dabagelayaana qawaaniin caqabadaha ka yaraynaya goobaha iyo adeegyada u furan dadweynaha.

   T) Ay xaqiijiyaan in ganacsiyada gaarka ah iyo hay'adaha leh adeeg u furan bulshada ay yihiin kuwo aan lahayn caqabad dhibta dadka naafada ah.

   J) Ay tababaraan cid kasta oo ku lug leh sidii wixii caqabad ah looga qaadi lahaa dadka naafada iyadoo laga shidaal qaadanaayo baahiyahooda.

   X) In lagu qoro luqadaha baraylka (luqada dadka indha ka naafada ahi fahmaan), isla markaana fariimo si fudud loo akhriyi karo loona fahmi karo dhismayaasha dadweynaha u furan.

   KH) In laga caawiyo dadka naafada ah si ay u galaan una isticmaalaan dhimayaasha dadweynaha sida, dad u akhriya farriimaha, dad tarjuma fara ku hadalka (luqada ay dadka maqalka ka naafada ahi fahmaan) iyo hagayaal kale.

D) In la siiyo wixii kale ee dadka naafada ah ka caawinaya in ay xog helaan (Information)

R) In kor loo qaado isticmaalka adeegyada technologiyada casriga ah ee dadka naafada ahi u baahan yihiin.

S) Marka la raadinayo ama la abuurayo techologiyad cusub in la xaqiijiyo laguna xisaabtamo bilowga horeba in ay isticmaali karaan qalabkaas cusub dadka naafada ahi, taasoo isla markaasna ay ugu kacaysa qiimo jaban.

Qodobka 10aad

Xaqa Nolosha

Waddamadu waxay oggolaadeen in dadka naafada ahi ay xaq u leeyihiin inay noolaadaan, waxayna ku dhaqaaqi doonaan inay xaqiijiyaan sidii dadka naafada ahi xaqoodaas u heli lahaayeen.

Qodobka 11aad

Xaaladaha khatarta ah iyo gurmadka bani'aadamnimada

Waddamadu waxay oggolaadeen inay tixgelin doonaan dhammaan heshiisyada kale ee ay galeen ee ku saabsan dagaalada ama xuquuqda bani'aadamka.

Waddamadu waxay tallaabo ka qaadayan siday u xaqiijin lahaayeen in xilliyada dagaalada, masiibooyinka dabiiciga ah ama xaaladaha kale ee deg degga ah dadka naafada ah laga samata bixiyo.

Qodobka 12aad

Si isku mida in dadka loogu xaqsooro sharciga hortiisa

Waddamadu:

1. Waxay oggolaadeen in dadka naafada ahi xaq u leeyihiin in loo aqoonsado dad ahaan sharciga hortiisa.

2. Waxay oggolaadeen in dadka naafada ahi ay karti u leeyihiin sida dadka kale marka ay noqoto arrimaha sharciga ee la xidhiidha dhammaan dhinacyada kala duwan ee noloshooda.

3. Waxay tallaabo ka qaadayaan inay xaqiijiyaan in dadka naafada ahi heli karaan gargaarka ay u baahan yihiin xagga sharciga.

4. Waxay oggolaadeen in dadka naafada ah laga caawiyo haddii ay u baahdaan gargaar sharciyeed ama mid dhaqaale si ay u hellaan xaqooda sharci.

    - Waxaa laga ilaalinayaa in loo awood sheegto.
    - Xaquuqdooda iyo rabitaankooda ayaa la ixtiraamayaa.
    - Dadka gargaarka u fidinayaa kuma qasbayaan dadka naafada ah inay go'aanka ay rabaan qaataan.
    - Waa inay helaan caawimada ay u baahan yihiin keliya wakhtiga ay u baahan yihiin iyo inta inta ay uga baahan yihiin.
    - Maxkamaduhu waxay dib u eegi doonaan oo qiimayn doonaan gargaarka la siiyay qofka naafada ah.

5. Waxay oggolaadeen inay hubiyaan in dadka naafada ah:

    - ay xaq u leeyihiin inay yeeshaan ama helaan hanti gaara.
    - ay xaq u leeyihiin inay maamulaan arrimaha maaliyaddooda iyo lacagtooda.
    - ay helaan fursad la mid ah ta dadka kale oo ay ku qaataan amaah baan, amaah guri iyo in la aamino.
    - Sinaba hantidooda loogama qaadi karo sabab la'aan.

Qodobka 13aad

Helid caddaaladeed

1. Waddamadu waxay xaqiijin doonaan in dadka naafada ahi ay isticmaali karaan garsoorka wadamadooda sida dadka kale.

   Waxay hubinayaan in sharciyada qeexaya sida wax loo fulinayo wixii isbeddel ah ee suurto gal ah lagu sameeyo si ay dadka naafada ahi uga qayb geli karaan dhammaan heerarka kala duwan ee garsoorka, tusaale ahaan inay markhaati noqon karaan.

2. Waddamadu waxay tababar siin doonaan dadka ka shaqeeya nidaamka garsoorka sida boliiska iyo shaqaalaha xabsiyada.

Qodobka 14aad

Xorriyadda iyo Amniga

1. Waxay Waddamadu:

   B) Xaqiijinayaan in dadka naafada ahi helaan xuquuqda xorriyad iyo amni oo la mid ah tan dadka kale.

   T) Xaqiijinayaan in dadka naafada ah aan xaqoodan looga qaadi Karin sabab la'aan, naafanimadooda darteed ama hab aan sharciga waafaqsanayn.

   1) Waddamadu waxay xaqiijinayaan haddii qof xorriyaddiisa laga qaado in sharcigu ilaaliyo. Waxa kaloo ay xaqiijinayaan in marka loo baahdo in isbeddel lagu sameeyo bay'adda uu qofku ku nool yahay si uu si fudud ugu noolaado isagoo haysta xuquuqdiisii bani'aadamnimo.

Qodobka 15aad

Ka badbaadin jidh dil, caddaawad, yasid, ciqaab iyo si xun ula dhaqan kale

1. Qofna lama jidh dili karo, ama loolama dhaqmi karo, loomana ciqaabi karo si bani'aadamnimada ka baxsan. Qofna laguma qasbi karo in uu ka qayb noqdo tijaabo caafimaad ama cilmiyeed.

2. Waddamadu waxay oggolaadeen inay ansixiyaan meel mariyaana tallaabooyin lagu xaqiijinayo in dadka naafada ah laga badbaadiyo jidh dilka sida dadka kale.

Qodobka 16aad

Ka badbaadin in si khalad ah looga faa'iidaysto qofka, ku tacadiyid, gacan ka hadal, iyo ku xad gudub

Waddamadu waxay:

1. Meel-marinayaan shuruuc iyagoo tallaabooyin kalena qaadaya si ay u xaqiijiyaan in dadka naafada ah aan si khalad ah looga faa'iidaysan, loogu xad gudbin, gudaha iyo debbedaba guryahooda.

2. Tallaabo ka qaadayaan si ay u horjoogsadaan si xun uga faa'iidaysiga dadka naafada ah iyagoo siinaya wixii taageero ah iyo wacyi gelin ku habboon si ay u xaqiijiyaan in dadka naafada ah iyo qoysaskooda laga ilaaliyo ku tumashada xuquuqdooda.

3. Xaqiijinayaan in hay'addaha iyo mashaariicda u adeega dadka naafada ah si joogta ah loola socdo si loo xaqiijiyo inaanay naafadu kala kulmin gacan ka hadal iyo tacadi.

4. Caawinayaan dadka naafada ah ee dhibaatooyinku ka soo gaadheen tacadiga iyo ku xad gudubka si ay uga bogsadaan isla markaana ay dib uga mid noqdaan bulshada iyagoo sharaftoodii huwan.

5. Abuurayaan shuruuc iyo nidaamo lagu soo baadho laguna ciqaabo dadka ku xad gudba ama si xun ula dhaqma dadka naafada ah. Shuruucdaas iyo nidaamyadaasi waxay xaqiijinayaan in baahida haweenka iyo carruurta aan la ilaawin.

Qodobka 17aad

Dhawrista karaamada qofka

Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin sida dadka kaleba in la ixtiraamo jidh ahaan iyo maskax ahaanba.

Qodobka 18aad

Xuquuqda safarka iyo dhalashada

1. Waddamadu waxay oggolaadeen in dadka naafada ahi sida dadka kale ay leeyihiin xaqqa inay ku safraan dalka gudihiisa ama dibeddiisaba, inay doortaan meesha ay ku noolaanayaan iyo inay helaan jinsiyad sida dadka kale. Waxa kaloo ay xaqiijinayaan in dadka naafida ahi:

B) Ay helaan xaqqa ay u leeyihiin inay beddelaan dhalashadadooda iyo inaan ciddina ka qaadi Karin dhalashadooda sabab la'aan, aan ka ahay naafannimadooda darteed.

T) Aan laga qaadi karin baasaboorradooda iyo waraaqaha kale ee aqoonsiga jinsiyadda, naafanimadooda awgeed haddii aanay jirin sabab macquula oo loo cuskadaa, iyo in loo oggol yahay inay wadan kale u safri karaan.

J) Ay xor u yihiin inay ka safraan waddankay u dhasheen ama wadan kaleba una safraan waddanka kale ee ay doonaan.

X) Aan laga horjoogsan Karin inay ku soo noqdaan waddankooda, naafanimadooda awgeed haddii aanay jirin sabab kale oo macquul ah oo arrintaa u diidaysa.

2. Carruurta naafada ah isla marka ay dhashaan ayaa la diiwaan gelinayaa. Waxaanay xaq u leeyihiin magac loo bixiyo, dhalasho, inay intii suurto gal

ah helaan xaqa aqoonsiga waalidkood, iyo xaqa ay u leeyihiin in waalidkood koriyo.

Qodobka 19aad

Nolol aan cidna ku tiirsanayn bulshada dhexdeeda

Waddamadu waxay oggolaadeen in dhammaan dadka naafada ahi leeyihiin xuquuq la mid ah dadka kale ee ku noolaanshaha bulshada dhexdeeda iyagoo si buuxda uga mid ah doorna ku leh bulshada dhexdeeda.

Taasi waxay xaqiijinaysaa in dadka naafada ahi:

B) Ay helaan fursado la mid ah dadka kale oo ay ku dooranayaan cidda ay la noolaanayaan, meesha ay ku noolaanayaan, iyo inaan lagu khasbi karin inay ku noolaadaan xeryo gaara oo lagu xannaaneeyo oo aanay jeclayn.

T) Inay lahaadaan ikhtiyaaro badan oo ay ku kala doortaan meesha ama sida ay ugu noolaanayaan bulshada dhexdeeda, taasoo ay ku jirto inay helaan gargaar shakhsi, iyo in laga gargaaro inay ka mid noqdaan nolosha bulshada dhexdeeda iyadoo laga ilaalinayo in meel cidla ah lagu oodo.

J) Inay isticmaali karaan adeegyada bulshada ee loogu talo galay dadweynaha kuwaas oo lagu jaangoynayo baahidooda gaarka ah.

Qodobka 20aad

Awood dhaqdhaqaaq

Waddamadu waxay xaqiijiyaan in dadka naafada ahi ay iskood u socon karaan ama u dhaqdhaqaaqi karaan sida ugu habboon ee suurta galka ah, taasoo ay ka mid tahay:

B) In laga caawiyo dadka naafada ah inay u socon karaan sida ay doortaan kuna salaysan qiimo ay awooddi karaan.

T) In laga caawiyo dadka naafada ah helitaanka qalabka iyo technolojiyad u sahlaya socodka iyadoo la xaqiijinayo inaanay ugu kicin qiimo aad qaali ugu ah.

J) In la siiyo dadka naafada ah iyo shaqaalaha u shaqeeyaba tababar xirfadeed si looga caawiyo naafada socodka iyo dhaqdhaqaaqa.

X) In la dhiirri geliyo dadka sameeya qalabka iyo technologiyadda dadka naafada ah socodka ka caawiya inay ku xisaabtamaan noocyada kala duwan ee qalabkaas.

Qodobka 21aad

Xorriyatul qawlka, soo bandhigidda fikirka iyo helidda xogta

Waddamadu waxay xaqiijin doonaan inay dadka naafada ahi soo bandhigi karaan fikirkooda, iyagoo isticmaalaya farta dadka aragtida ka naafada ahi ay isticmaalaan, iyo fara ku wada hadalka ee lagula hadlo dadka maqalka ka naafada ah iyo noocyada kale ee war is gaarsiineed ee ay iyagu doortaan.

Waddamadu waxay kale oo xaqiijin doonaan in dadka naafada ahi ay leeyihiin xaq la mid ah kan dadka kale dhinaca xog helidda iyo war gudbinta, sida:

B) In dadka naafada ahi ay helaan wararka bulshada loo gudbinaayo iyadoo loogu gudbinaayo hab iyaga u gaar ah oo ku habboon, iyadoo aan ku keenaynin inay kharash dheeraad ah bixiyaan (tusaale ahaan iyadoo loogu gudbinaayo farta dadka aragga ka naafada ah)

T) In la aqballo siyaalaha kala duwan ee dadka naafada ah warka u soo gudbiyaan xaaladaha dawliga ah ee rasmiga ah.

J) In lagu dhiirri geliyo ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo haya'adaha maddaxa bannaan ee u adeega bulshada inay addeegooda ka dhigaan mid ay isticmaali karaan dadka naafada ahi

X) In lagu dhiirri geliyo warbaahinta inay wararka ka dhigaan qaar ay dadka naafada ahi fahmi karaan lana socon karaan

Kh) In la oggolaado oo la horumariyo isticmaalka fara-ku-wada-hadalka lagula hadlo dadka maqalka ka naafada ah.

Qodobka 22aad

Tixgelinta arrimohooda hoose (shu'uunta Daakhiliga)

Waddamadu waxay xaqiijin doonaan:

1. Inaanu qofna faragelin ku samaynin arrimaha shakhsiga ah ee dadka naafada ah u gaarka ah, sabab la'aan; amaba aanu u faragelin hab sharciga ka soo horjeedda. Waddamadu waxay kale oo ay xaqiijin doonaan inaanu qofna meel-ka-dhac ku samayn karin si sharci darro ah, sharafta iyo sumcadda ay leeyihiin dadka naafada ahi. Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin inuu sharcigu ka ilaaliyo xadgudubyada noocaas ah.

2. In siraha qofeed, caafimaad iyo socod ka caawinta dadka naafada ah loo ilaaliyo si la mid ah tan dadka kale.

Qodoblka 23aad

Tixgelinta Guri iyo Qoys lahaanshaha

1. Waddamadu waxay ku tallaabsan doonaan in la joojiyo takoorka lagula kaco dadka naafada ah dhinacyada guurka, iyo xidhiidhka qoys ahaaneed. Haddaba si loo xaqiijiyo taas:

B) Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin inay guursadaan oo xaas yeeshaan iyo qoysas sida dadka kaleba;

T) Dadka naafada ahi waxay leeyihiin xaq la mid ah ka dadka kale sida inay carruur dhalaan, go'aansadaan tirada carruurta ay dhalayaan iyo xilliga ay doortaan inay dhalaan. Waa inay helaan xogaha iyo aqoonta ku saabsan taranka iyo kala fogeynta dhalmada. Waa in laga caawiyaa siday u fahmi lahaayeen xogahan;

J) Dadka naafada ahi waxay leeyihiin xaq la mid ah kan dadka kale inay tarankooda dhalmo ay lahaadaan;

2. Waddamadu waxay xaqiijin doonaan inay dadka naafada ahi yeeshaan xuquuqaha iyo masuuliyadaha la xidhiidha korsashada carruurtooda, iyo korsashada carruur kale oo aanay dhalin, iyadoo muhiimadda koowaad ay yeelanayso sida danta ilmuhu ku jirto. Waddamadu waxay ka taageeri doonaan dadka naafada ah sidii ay u fulin lahaayeen masuuliyadohooda la xidhiidha korinta carruurtooda.

3. Waddamadu waxay xaqiijin doonaan carruurta naafada ahi inay helaan xuquuqo la mid ah kuwa qof kasta, si ay qoyskooda ula noolaadaan. Bilowga horeba Waddamadu waxay siin doonaan xogo, adeegyo, iyo taageero carrruurta naafada ah iyo qoysaskooda.

4. Ilmaha lagama qaadi karo waalidkii isagoo ilmuhu doonaya, ilamaa loo arko in danta ilmuhu ku jirto sidaaas, markaana waxaa loo marayaa sifo sharciga waafaqsan. Ilmaha iyo waalidkiis lama kala kaxayn karo iyadoo sabab looga dhigaayo naafanimada ilmaha ama naafanimada waalidka.

5. Haddii qaraabadiisa dhow (sida waalidkiis, walaalihiis) ay daryeeli kari waayaan ilamaha naafada ah, waxaa marka koowaad lala raadinayaa qaraabadiisa durugsan inay daryeelaan; haddii qaraabo durugsan lala waayana bulshada uu ku dhex nool-yahay ayaa daryeelaysa.

Qodobka 24aad

Waxbarashada

1. Waddamadu waxay oggolaadeen in dhammaan dadka naafada ahi xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho; Waxay xaqiijin doonaan in nidaamka waxbarasho ee heer walba lagu daro baahiyaha waxbarasho ee dadka naafada ah; iyo in nidaamka waxbarasho uu:

B) U hawl geli doono inay xaqiijiyaan in qof waliba kobciyo awoodiisa waxbarasho iyo kartiyeed, sharafeed iyo qiimaha shakshsiyaddiisa, iyadoo la tixgelinaayo xuquuqul insaanka, xorriyadda iyo kala duwanaanshaha.

T) Waddamadu waxay u hawl geli doonaan in dadka naafada ah la horumariyo lana gaadhsiiyo heerka ugu sarreeya ee suurtogal ah;

J) Waddamadu waxay u hawl geli doonaan sidii dadka naafada ah ay xubno firfircoon bulshada uga noqon lahaayeen;

2. Haddaba si loo gaadho arrimahaas kor ku xusan, Waddamadu waxay xaqiijin doonaan:

B) Inaan dadka naafada ah laga takoorin waxbarashada iyadoo sabab looga dhigaayo naafannimadooda. Carruurta naafada ah waa inaan laga takoorin waxbarashada heerka aasaasiga iyo dugsiyada sare oo bilaash ah, khasabna ah, iyadoo lagu takooraayo naafannimadooda.

T) In dadka naafada ah oo dhan la siiyo inay dooran karaan waxbarasho ku habboon baahidooda, oo ay dhigan karaan oo bulshadooda dhexdeeda ay ka heli karaan.

J) Wixii isbeddel ee macquul ah waa in la sameeyaa ee u suurtogelinaya dadka naafada ah inay waxbarashadooda ka helaan faa'iidada ugu badan.

X) Dadka naafada ahi waa inay helaan wixii taageero ah ee ka caawinaaya inay waxbarashada uga faa'iidaystaan sida ugu habboon.

Kh) Ardayda naafada ah waa in la siiyaa taakulo wixii ay u baahan yihiin si baahiyohooda gaarka ah loo daboolo

3. Waddamadu waxay u hawl geli doonaan sidii dadka naafada ah loo bari lahaa xirfadaha nolosha iyo bulsho ee ay u baahan yihiin si ay wax u bartaan bulshadana uga mid ahaadaan. Si taas loo gaadhona, Waddamadu waxay fulin doonaan:

B) In loo habeeyo ardayda naafada ah si ay u bartaan farta dadka aragga naafada ka ah (Braille) iyo noocyada kale ee war-is-gaadhsiineed, waana inay helaan barbaarin iyo talosiin.

T) In wax lagu baro afka faro-ku-wada-hadalka ee dadka maqalka ka naafada ah.

J) Waxay xaqiijin doonaan in carruurta baahiyaha gaarka ah leh, sida carruurta aragga ka naafada ah, maqalka ka naafada ah, iyo kuwa aragga iyo maqalkaba ka naafada ah ay helaan waxbarasho aad ugu habboon iyadoo loo adeegsanaayo qaababka ugu habboon ee war-is-gaadhsiineed si ay waxbarashadooda uga faa'iidaystaan

4. Si ay u xaqiijiyaan in xuquuqahan la dhaqan geliyey, Waddamadu waxay raadsan doonaan macallimiin naafo ah, macallimiin takhasus ku ah farta loogu talo galay dadka aragga ka naafada ah (Braille), iyo luqadda faro-ku-wada-hadalka dadka maqalka ka naafada ah, waxaanay tababarro siin doonaan macallimiinta iyo shaqaalaha dhammaan heer kasta oo waxbarasho – si waxbarasho tayo leh ay u helaan dadka naafada ahi.

5. Waddamadu waxay xaqiijin doonaan inay dadka naafada ahi helaan xaq la mid ah kan dadka kale ee xagga tababarrada xirfad abuurka, waxbarashada heer jaamacadeed, iyo waxbarashada socota sida dadka kale oo dhan. Waxay kale oo samayn doonaan isbeddel kasta oo loo baahdo si hawlahan loo meel mariyo

Qodobka 25aad

Caafimaadka

Waddamadu waxay aqoonsadeen in dhammaan dadka naafada ahi ay xaq u leeyihiin inay helaan adeeg caafimaad oo tayo sare leh, iyadoo aan lagu takoorayn naafonnimadooda.

Waddamadu waxay xaqiijin doonaan in addeegyo caafimaad, iyo adeegyada tayo-soo celinta (rehabilitation) ay ahaadaan qaar la heli karo, sida:

B) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahi ay helaan adeeg caafimaad oo la mid ah kan ay dadka kale helaan, lehna kala duwanaansho, oo tayo wanaagsan leh, ahna bilaash ama la awoodi karo kharash ahaan in layska bixiyo.

T) In Waddamadu xaqiijiyaan inay dadka naafada ahi heli karaan adeegyada ay u baahan yihiin ee naafannimadoodu keenayso, si looga hortago inay naafonnimo dheeraad ahi ku dhacdo;

J) Inay bulshadooda dhexdeeda ka helaan adeegga caafimaad ee ay u baahan yihiin;

X) In lagu adkeeyo shaqaalaha caafimaadku inay siiyaan dadka naafada ah adeeg caafimaad oo la tayo ah lana mid ah kan ay dadka kale siiyaan; tusaalle ahaan adeeggan waxaa la siin karaa keliya haddii qofka naafada ahi oggolaado, loona sheega xuquuqohooda, iyadoo tababarro loo addeegsanaayo, iyo iyadoo lagu dhaqmaayo qawaaniinta u deggan caafimaadka.

Kh) In dadka naafada ah laga ilaaliyo takooridda dhinacyada caymiska bulshada, iyadoo la hubinaayo in caymiskan si caddaalad ah loo bixiyey.

D) In la xaqiijiyo in aan dadka naafada ah laga takoorin adeegyada caafimaadka iyo quudinta iyadoo naafanimadooda lagu takoorayo loona diidayo.

Qodobka 26aad

Tayo-soo-celinta (rehabilitation)

1. Waddamadu waxay ku dhaqaaqi doonaan tallaabooyin iyadoo la kobcinayo istaageeridooda si dadka naafada ah loogu suurtogeliyo inay helaan madaxbannaani, karti dhammaystiran, si ay qaybaha kala duwan ee nolosha si buuxda uga qayb galaan. Si loo xaqiijiyo inay arrimahaasi qabsoomeen, Waddamadu waxay abuurayaan adeegyo daboolaya dhammaan qaybaha kala duwan ee nolosha, si dadka naafada ah nolol fiican dib loogu tababaro. Si hawshaasi u qabsoonto waa in:

B) Ay u bilaabaan adeegyada sida ugu dhakhso badan iyadoo lagu salaynaayo awooddaha iyo baahiyaha qof naafonnimo gaar ah leh.

T) In dadka naafada ah laga caawiyo inay ka qayb-qaataan oo lagu daro adeegyada ka jira bulshadooda

J) Inay addeegyadani ahaadaan qaar ay dadka naafada ahi ka heli karaan meesha ugu dhow ee suurtogal ah ee bulshadooda dhexdeeda ah;

2. Waddamadu waxay kobcin doonaan sidii loo tabobari lahaa shaqaalaha ka hawl-gala adeegyada dibu-u-laylyidda dib loogu hagaajinaayo nolosha dadka naafada ah

3. Waddamadu waxay kor u qaadi doonaan wixii qalab dadka naafada ah ka caawin kara nolol tayo leh sida kuwa socodka ka caawiya iyo kuwa maqalka ka caawiya iwm; ee la xidhiidha dib-u-laylyidda ama ku dabbaalid nolol tayo leh.

Qodobka 27aad

Shaqada iyo shaqaalaynta

Waddamadu waxay oggolaadeen in dadka naafada ahi ay leeyihiin xuquuq la mid ah tan dadka kale dhinaca shaqada. Taas macneheedu waxa weeye inay qaban karaan shaqo ay kala soo baxaan nolol maalmeedkooda, iyagoo shaqadaas iyagu dooranaya goobta shaqona waa inay noqotaa mid u furan dadka oo dhan oo ay ka hawl-geli karaan.

1. Waddamadu waxay ansixin doonaan shuruuc, kana hawl-geli doonaan tallaabooyinka kale ee loo baahan yahay sida:

B) In la joojiyo takooridda dadka naafada ah, dhammaan xaaladaha la xidhiidha shaqada iyo shaqaalaynta. Tani waxay la xidhiidhaa tusaalle ahaan xaaladaha ay dadka naafada ahi isku dayaan inay shaqo helaan, la shaqaaleeyey ama shaqo loo dallacsiiyey, waa in la xaqiijiyaa in goobta shaqo ay tahay mid aan khatar lahayn oo caafimaadka aan wax yeelaynin.

T) Waa in la ilaaliyaa in dadka naafada ah xuquuqdooda shaqaalenimona aan lagu xadgudbin, sida in mushahar iyo fursado la mid ah dadka kale la siiyo marka ay shaqo isku mid ah qabtaan, goobta shaqona laga dhigo mid aan khatar iyo wax caafimaadka waxyeelaynaya lahayn, isla markaasna fursad loo siiyo inay soo gudbin karaan wixii cabashooyin ah.

J) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahi yeelan karaan kuna biiri karaan ururro shaqaale iyo ururro ganacsi sida dadka kaleba

X) Waa in la suurtageliyaa in dadka naafada ahi helaan la talin xagga shaqadooda ah (career counselling) iyo tababarro xirfad abuur ah.

KH) In kor loo qaado shaqaalaynta, horumarinta awoodda shaqo helid, iyo in laga caawiyo dadka naafada ahi inay helaan shaqooyin iyo inaanay shaqooyinka ay helaan luminin.

D) In kor loo qaado shaqo-abuurista, fursadaha ganacsi iyo wixii ay ganacsi ku bilaaban lahaayeen.

R) In dadka naafada ah shaqooyin laga siiyo dawladda

S) In lagu dhiirri geliyo lagana caawiyo loo-shaqeeyeyaashu inay shaqooyin siiyaan dadka naafada ah.

Sh) In loo fududeeyo dadka naafada ahi inay goobaha shaqo ku jiraan, iyadoo la xaqiijinaayo in gunnooyin macquul ah loo qoondeeyo.

Dh) In loo hawlgalo in dadka naafada ahi ay heli karaan khibrad shaqo oo ay

kaga hawlgalaan suuqyada shaqo.

C) In kor loo qaado mashaariic dib-u-tababarid iyo xirfadeed si dadka naafoobey looga taageero sidii ay shaqooyinkoodii dib ugu laaban lahaayeen una haysan lahaayeen.

2. Waddamadu waxay xaqiijin doonaan inaan dadka naafada ah la addoonsan. Waxayna dadka naafada ah ka ilaalin doonaan inay khasab shaqo ku qabtaan, sida dadka kaleba taas looga ilaaliyo.

Qodobka 28aad

Nolol heer habboon ah iyo Taakulo iyo ilaalin

1. Waddamadu waxay aqoonsadeen xuquuqda dadka naafada ahi u leeyihiin inay helaan nolol ku habboon naftooda iyo tan qoysaskood, taasoo ay ku jiraan cunto ku filan, hu', hoy iyadoo si joogto ah kor loogu qaadayo xaaladdooda nololeed.

2. Waddamadu waxay kale oo aqoonsadeen in dadka naafada ahi xaq u leeyihiin inay helaan taakulo iyo ilaalin dawladdu siiso, iyadoon lagu takooraynin naafonnimadooda.

3. Waddamadu waxay ilaalin doonaan xuquuqdan, sida iyagoo xaqiijinaya:

B) In dadka naafada ahi helaan adeegyada lama huraanka ah, qalab, iyo taakulo ka caawinaysa baahiyaha la xidhiidha naafannimadooda.

T) Dadka naafada ahi waa inay helaan taakulo dawladeed iyo mashaariic ay kaga baxaan saboolnimada. Si gaar ah, waxaa mudnaan u leh gabdhaha, haweenka iyo dadka da'da ah ee naafada ah.

J) Dadka naafada ah ee saboolka ah iyo qoysaskooda waa in dawladdu ka bixisaa wixii kharash ah ee la xidhiidha naafannimadooda.

X) Dadka naafada ahi waa inay wax ka helaan guryaha dawliga ah;

Kh) Dadka naafada ahi waa inay helaan bisil (pension)

Qodobka 29aad

Ka qayb-qaadashada siyaasadda iyo nolosha guud

Waddamadu waxay aqoonsadeen xuquuqda siyaasadeed ee dadka naafada ah, iyadoo aan sinaba loo takoorin, waxayna:

B) Xaqiijin doonaan in dadka naafada ahi si buuxda uga qayb qaataan siyaasadda iyo nolosh guud ee bulshada; Tusaalle ahaan inay xaq u leeyihiin inay wax doortaan lana dooran karo. Si taas loo gaadho, Waddamadu waxay xaqiijin doonaan:

i. In habka codbixintu ahaado mid si fudud loo fahmi karo loona codayn karo.

ii. In la ilaaliyo xuquuqda muwaadin kasta inuu si sir ah u codeeyo, lana doorto.

iii. In muwaadiniinta naafada ahi haddii ay u baahdaan cid ka caawisa coddaynta, inay wakiilan karaan qof ay iyagu doorteen oo halkoodii ka codeeya.

T) In dadka naafada ah lagu dhiirri geliyo inay ka qayb-qaataan hawlaha dawliga ah, iyo inay ka qayb-galaan arrimaha ijtimaaciga ah, sida:

i. Inay ka qayb-galaan urrurada aan-dawliga ahayn iyo hay'adaha ay hawlaha la xidhiidha xisbiyada siyaasadda, iyo ururrada bulshada rayidka ah.

ii. Inay abuuraan, kuna biiri karaan ururrada dadka naafada, si ay u metelaan dadka naafada ah, heer qaran, heer gobol iyo heer degmo.

Qodobka 30aad

Ka qayb-qaadashada arrimaha dhaqanka, madaddaalada, iyo ciyaaraha

1. Waddamadu waxay aqoonsadeen xaqa ay u leeyihiin dadka naafada ahi inay ka qayb-qaataan arrimaha dhaqanka, waxayna u hawl-geli doonaan sidii ay u xaqiijin lahaayeen in:

B) Dadka naafada ahi ay isticmaali karaan qoraallada suugaaneed iyo noocyada kale ee qoraallada ah, iyagoo ku qoran qaab ay isticmaali karaan sida farta ay fahmaan dadka aragga ka naafada ah, iyo kuwa maqalka ka naafada ah qaab ay isticmaali karaan.

T) Dadka naafada ahi waa inay heli karaan barnaamijyada telefishanka, filimada, masraxiyadda golayaasha madaddaalada, iyo wixii hawlo kale ee hawlo dhaqameed ah, iyagoo loogu soo gudbinaayo hab ay ku fahmi karaan, iyadoo wadata sharrax ay fahmi karaan dadka naafada ah sida fara-ku-wada hadalka dadka maqalka ka naafada ahi fahmaan.

J) Dadka naafada ahi isticmaali karaan goobaha murtida iyo madaddaalada sida rugaha kutubta, guryaha hiddaha iyo dhaqanka, tiyaatarrada, iyo goobaha kale ee muhiimad qaran leh.

2. Waddamadu waxay u hawl-geli doonaan inay dadka naafada ahi isticmaalaan, horumariyaan ikhtiraacooda, farshaxannimadooda iyo hiwaayadddooda maskaxeed.

3. Waddamadu waxay qaadi doonaan tallaabooyin ay ku xaqiijinayaan in shuruucda ilaalisa xaqa qoraaga ee wixii dokumenti qoraal ah ama hal abuur ah, in la foojari gareeyo ama la daabacdo oggolaansho la'aan, laakiin ilaalintaasi aanay takoor ku samaynin dadka naafada ah.

4. Dadka naafada ahi waxay leeyihiin xaq la mid ah kan dadka kale in la aqoonsado dhaqankooda iyo luqadooda, tusaalle ahaan fara-ku-wada hadalka dadka maqalka ka naafadaha ahi fahmaan iyo dhaqankooda.

5. Waddamadu waxay aqoonsadeen inay dadka naafada ahi xaq u leeyihiin inay ka qayb-qaataan ciyaaraha madadaalada ah iyo ciyaaraha tartanka ah. Waddamadu waxay ka hawl geli doonaan inay:

B) Dhiirrigeliyaan lana horumariyo sidii ay dadka naafada ahi ugala qayb-qaadan lahaayeen ciyaaraha kala duwan ee heer kasta dadka aan naafada ahayn.

T) Xaqiijiyaan inay dadka naafada ahi fursad u helaan sidii ay u abaabulan lahaayeen ugana qayb-qaadan lahaayeen hawlaha ciyaaraha, in la siiyo tababarro iyo taageero la mid ah tan dadka kale helaan.

J) In dadka naafada ahi helaan meel ay ka galaan iyo meel ay ka daawan karaan ciyaaraha, sida dadka kale.

X) In la xaqiijiyo in carruurta naafada ahi ka qayb-qaataan ciyaaraha iskuullada sida carruurta kale.

KH) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahi ay helaan adeegyo ka caawiya sidii ay u habaysan lahaayeen madaddaalo iyo hawlaha ciyaaraha.

Qodobka 31aad

Xog ururin iyo tiro koob (Statistics)

1. Waddamadu waxay ururinayaan isla markaana ka baaraandegayaan istatistikiska(Tiro koob) iyo macluumaadka kale si looga howlgalo heshiiskan.

Ururinta xogahani waxay:

B) Tixgellinaysaa xaqa ay dadku u leeyihiin in ay sirtoodu u dhawrsoonaato. Waxaa macluumaadkan la bixin karaa oo kaliya marka uu oggol yahay qofka naafada ahi.

T) Dhawraysaa xuquuqul insaanka iyo hab dhaqanka wanaagsan marka la ururinayo ama la isticmaalayo istatistikiskaas.

2. Xogta la ururiyay waxaa loo kala jajabin doonaa dhinacyo kala duwan si ay Waddamadu sida ugu fiican ugu fahmaan habka loo dhaqan gelinayo heshiiskan, wax badanna ka ogaadaan caqabadaha kortaagan dadka naafada ah.

3. Waddamadu waxay qaadeen masuuliyadda inay qaybiyaan faafiyaanna macluumaadka ku saabsan heshiiskan iyo in la xaqiijiyo in uu u qoran yahay qaabka Baraylka (farta dadka arragga ka naafada ahi isticmaalaan) ama si fudud loo akhriyi karo, tusaale ahaan, si ay dadka naafada ahi u fahmi karaan ama u adeegsan karaan.

Qodobka 32aad

Iskaashi caalami ah

1. Dawladuhu waxay ogoladeen in ay muhiim tahay in ay wada shaqeeyaan si ay u xaqiijiyaan in mid kasta oo ka mid ahi uu dhaqan geliyo heshiiskan. Waxay ku tallaabsan doonaan inay wada shaqeeyaan iyo inay la shaqeeyaan gaar ahaan ururada dadka naafada ah si:

B) Ay u xaqiijiyaan in dadka naafada ahi ay qayb ka yihiin barnaamijyada horumarineed ee caalamiga ah.

T) Ay u xaqiijiaan inay wada shaqeeyaan si ay dadka u wacyigeliyaan iyagoo is weydaarsanaya macluumaad iyo waaya aragnimo, tababarro iyo wax yaalaha wanaagsan ee ay dalalka qaarkood ku guulaysteen.

J) Ay isaga kaashadaan dhinacyada Sayniska iyo technologiyadda.

X) Loo siiyo gargaar farsamo iyo dhaqaale, tusaale ahaan in la wadaago layskana gacan qabto technolojiyadda casriga ah.

2. Dawladaha lagama yeelayo inay cudurdaar ka dhigtaan inaanay gargaar iyo gacan qabasho ka helin dalalka kale sidaa awgeedna aanay u dhaqan gelin karin heshiiskan.

Qodobka 33aad

Fulin Heer Qaran ah iyo Dabagal

1. Waddamadu waxay xaqiiyinayaan in ugu yaraan loo qoondeeyo hal kursi oo ka mida dawladda kaas oo ka masuul noqon doona in la xaqiijiyo in heshiiskani dhaqan galo.

2. Waddamadu waxay xaqiijiyaan inay dawladdu abuurto hay'ad dawliya oo madax bannaan taasoo dabagal ku samayn doonta sida heshiiskan loo dhaqan geliyay.

3. Ururada aan dawliga ahayn, gaar ahaan dadka naafada ah iyo ururadooduba waxay si buuxda uga shaqaynayaan inay la socdaan dushana ka eegaan sida dalku ugu dhaqmo heshiiskan.

Qodobka 34aad

Guddida xuquuqda dadka naafada ah.

1. Waxaa la abuurayaa Guddi ilaalisa xuquuqda dadka naafada ah.

2. Marka heshiiskani uu sharciyoobo, Guddidu waxay ka koobnaan doontaa 12 khabiir. Ka dib marka 60 dal oo kale oggolaadaan heshiiskan waxaa lagu kordhinayaa 6 khabiir oo kale taasoo ka dhigaysa tirade xubnaha ugu badnaan 18 xubnood.

3. Xubnaha Guddidu waxay u shaqeeynayaan qof qof. Waxaanay ku sifoobayaan anshax iyo dhaqan wanaag aad u sareeya isla markaana khibrad iyo waaya aragnimo u leh naafada.

4. Waddamadu waxay dooranayaan xubnaha Guddida iyagoo xaqiijinaya in ay ka kala yimaadaan dunida oo dhan, kana koobnaadaan rag iyo dumar, dad naafo ah, isla markaana ay leeyihiin aqoon sharci oo kala duduwan.

5. Marka dawladuhu shir isugu yimaadaan xubnaha Guddida si sir ah ayaa loo dooranayaa. Qofka la dooranayaana waa inuu helaa codadka ugu badan isla markaana waa inay in ka badan kala badh xubnaha goob joogga ah shirka ay codkooda siiyaan qofkaa.

6. Doorashada koowaad waxay dhici doontaa lixda bilood ee ugu horreeya gudahood ka dib marka heshiisku sharciyoobo. Intaa wixii ka dambeeyana afar bilood ka hor doorasho kasta ayaa Xooghaya Guud ee Qaramada Midoobay u qori doonaa warqad uu kaga codsanayo dalalku inay soo magacaabaan xubnihii Guddida uga qayb geli lahaa taasoo ay ku soo dhamystiri doonaan laba bilood gudahood.

7. Xubnaha Guddidaasi waxay shaqeynayaan muddo afar sannadood ah iyadoo markaliya uun loo cusboonaysiin karo xubinimda. Doorashada koowaad kadib, lix xubnood oo Guddida ka mida ayaa laba sano ka dib la beddeli doonaa.

8. Marka ay gaadho wakhtiga ku habboon in la qaato 6da xubnood ee lagu darayo guddida, waxaa lagu dooranayaa doorashooyinka caadiga ah.

9. Haddii xubin Guddida ka tirsani dhimato ama ka tagto, waddankii xubintaa soo magacaabay ayaa ku soo beddelaya khabiir kale oo shaqeeya muddada u hadhsanayd xubinta hore.

10. Guddidu iyagaa samaysanaya shuruucda ay ku shaqaynayaan.

11. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa siin doona shaqaale iyo xafiiska saldhigga u noqonaya Guddida si loo xaqiijiyo inay Guddidu u shaqayn karto si habsami ah.

12. Xubnaha Guddidu shaqada ay qabanayaan waxaa lagu siin doonaa mushahar kaasoo uu go'aamin doono golaha loo dhan yahay ee qaramada midoobay inta uu mushaharadaasi leekaanayo.

13. Xubnaha Guddidaasi waxay yeelanayaan xuquuq la mida ta ay leeyihiin khabiirada kale ee Qaramada Midoobay.

Qodobka 35aad

Warbixin ay diyaariyaan Waddamadu

1. Waddan kastaa wuxuu Guddida u soo qorayaa warbixin muddo laba sano gudahood ah laga bilaabo marka heshiisku noqdo sharci. Waddamadu waxay ka soo warbixinayaan siday u dhaqan geliyeen heshiiska.

2. Intaa ka dib waddan kastaa wuxuu Guddida warbixin soo siinayaa ugu yaraan 4 tii sanaba mar.

3. Guddida ayaa go'aaminaysa waxaa warbixintu ka koobnaanayso.

4. Marka waddan warbixinta koowaad qoro waa in aanu ku soo celcelin macluumaadkii hore warbixinaha dambe. Waxa loosoo jeedinayaa waddamadu inay warbixintooda u qoraan si aan qarsoodi ahayn lagana talo geliyay dadka naafada ah iyo ururadooda.

5. Waddamadu waxay warbixintooda ku dari karaan arrimaha dhibaatooyinka ay kala kulmeen dhaqan gelinta heshiiskan.

Qodobka 36aad

Tixgelinta Warbixinaha

1. Marka ay Guddidu hesho warbixinta waxay:

    - Dib u eegi doontaa warbixinta isla markaana faalo iyo talayooyinba ka bixinaysaa.
    - Dib ugu celin doontaa faalada iyo talooyinkaba waddankii warbixinta soo diyaariyay.
    - Waddanku wuxuu dib u siin karaa Guddida macluumaad dheeraada.
    - Waxaanu waddanku waydiisan karaa Guddida faah faahin dheeraada haddii loo baahdo.

2. Haddii waddan uu si aada warbixinta wakhtigeeda ugala dib dhaco Guddidu waxay:

    - Waddankaa u sheegi doontaa inuu ka dib dhacay wakhtigii

    - Haddii saddex bilood ka dib aanu waddankii soo gudbin warbixintii Guddidu waxay waddankaa u sheegi doontaa in loo baahan yahay in Guddidu soo eegto soona qiimayso sida wadankaasi u dhaqan geliyay heshiiska.

3. Xooghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu waddan kasta u gudbin doonaa warbixinaha ka yimi waddamada kale.

4. Waddamadu waxay si furan u bandhigayaan warbixinta dalalkooda gudahooda waxayna oggolaanayaan in faallo iyo tallo soo jeedinba laga bixiyo warbixinta.

5. Haddii loo baahdo Guddidu waxay warbixinta dal u gudbin doontaa hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay, si ay uga caawiyaan waddankaa dhinaca farsamada.

Qodobka 37aad

Iskaashiga Dawladaha iyo Guddida.

1. Waddan kastaaba wuxuu la shaqayn doonaa Guddida kana caawin doonaa inay gutaan waajibkooda.

2. Marka ay Guddidu la shaqaynayso waddamada waxay isku deyi doonaan inay sameeyaan sidii loo xaqiijin lahaa in dalalku helaan wixii ay u baahan yihiin si ay ugu fududaato dhaqan gelinta heshiisku.

Qodobka 38aad

Xidhiidhka ka dhexeeya Guddida iyo Hay'addaha kale

Si loo xaqiijiyo in heshiiska la dhaqan geliyo isla markaana la dhiiri geliyo waddamadu inay wada shaqeeyaan waa:

B) In hay'adaha laga qayb geliyo shirarka Guddida marka ay Guddidu qaadaadhigayso arrin ay hay'addaasi ku shaqo leedahay. Guddidu waxay ku martiqaadi kartaa hay'addahaas shirarka marka loo baahdo khibraddooda. Guddidu waxa kaloo ay waydiisan kartaa hay'addahaasi inay ka soo warbixiyaan sida waddamadu ay u dhaqan gelinayaan heshiiska.

T) Waxaa jira todoba Guddi oo kale oo eegaya sida ay waddamadu u hirgelinayaan heshiisyada xuquqda bani'aadamka ee kale, tusaale ahaan, heshiisyada dumarka, carruurta iwm. Guddidu waxay la tashan doontaa Guddiyadaa kale si ay u hubiso inaanay hawl kaliya laba Guddi u qaban, iyo inay xaqiijiso in Guddidu ay siinayso waddamada tilmaamo iyo tallooyin isku mida oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee heshiiska loo dhaqan gelin karo.

Qodobka 39aad

Warbixinta Guddida

Guddidu waxay warbixin u qori doontaa Golaha loo Dhan yahay iyo Golaha Dhaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada labadii sanaba mar. Guddidu waxay samayn doonaan soo jeedimo iyo talo bixino ku salaysan warbixinaha ay helaan.

Qodobka 40aad

Shirka waddamada heshiiskan qaybta ka ah

1. Waddamadu waxay u kulmayaan si joogto ah iyagoo ka tashanaya arimaha ku saabsan sida loo hirgelinayo heshiiska.

2. Lix bilood gudahood marka heshiisku sharciyoobo ka dib ayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu qaban qaabin doonaa shirka koowaad. Intaa ka dibna shirku wuxuu dhici doonaa labadii sanabo mar ama sida ay go'aansadaan waddamadu.

Qodobka 41aad

Kaydin

Heshiiskan waxaa lagu kaydinayaa xafiiska Xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay

Qodobka 42aad

Saxeexidda

Heshiiskan waxaa loo furi doonaa inay saxeexaan dhammaan waddamada oo dhammi, laga bilaabo 30ka bisha Maarso ee 2007, iyadoo saxeexiddu ka furnaan doonto Xafiiska Guud ee Qaramada Midoobay ee ku yaal New York.

Qodobka 43aad

Oggolaansho in lagu dhaqmo heshiiska

Dawladaha toos u saxeexay heshiiskan waa inay ansixiyaan, taasoo macneheedu yahay inay dawladohoodu qaadaan masuuliyadda fulinta iyo ku dhaqanka heshiiskan.

Haddii aanay toos markaba u saxeexin heshiiskan, waxay Waddamadu codsan karaan inay mar dambe ku soo biiri karaan.

Qodobka 44aad

Ururro goboleedyo

1. Ururro goboleed waxaa looga jeedaa waddamo badan oo isku mandaqad ah (isku gobol), oo ururradan u samaystay inay wakiil uga noqdaan arrimaha heshiiskani daboolayo.

2. Marka heshiiskani ka hadlaayo waddamada wuxuu sidoo kale u jeedaa ururro goboleedyadan loo wakiishay heshiiskan.

3. Marka la tirinaayo tirade waddamada saxeexay heshiiskan, tirada laguma daraayo ururro goboleedyadan.

4. Ururro goboleedyadani way codayn karaan xilliyada shirarka, waxayna yeelan doonaan tirada codadka oo u dhiganta tirada dalalka ay metelaan. Haddii dalalka xubnaha ka ahi urur goboleedyadani ay door bidaan iney iyagu toos u codeeyaan, markaas urur goboleedku xaq uma laha inuu codeeyo.

Qodobka 45aad

Dhaqan gelidda

1. Heshiiskani wuxuu sharci noqon doonaa maalinta 30aad, kaddib marka ay 20 dal ansixiyaan, ama ay codsadaan inay dib u dhigtaan ansixintiisa.

2. Intaas kaddib, Marka ay Waddamadu aqbalaan heshiiskan, wuxuu sharci ku noqon doonaa 30 cisho kaddib aqbalaaddooda

Qodobka 46aad

Qayb diiddid,

1. Waddamadu waxay muujin karaan inaanay qayb heshiiska ka mid ah oggolayn, taas oo macneheedu yahay inay marka ay saxeexayaan heshiiskan sheegi karaan inaanay fulin doonon qodobada qaarkood.

   Balse, qayb diiddidani ma noqon karto mid ka hor imanayso ujeedada iyo nuxurka heshiiskan.

2. Qayb diiddidani waa laga noqon karaa markii la doono.

Qodobka 47aad

Wax-ka-beddelka heshiiska

1. Dawlad kastaa way soo bandhigi kartaa wax ka beddel lagu sameeyo heshiiskan iyadoo loo gudbinaayo Xoghayaha Guud ee Qaramada midoobay.

   Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu u gudbin doonaa wax ka beddelka loo soo gudbiyey dalalka kale.

   Haddii afar bilood gudohood, ugu yaraan saddex meeloodow –meel dalalka oo dhammi ay oggolaadaan inay kulmaan si ay ugu codeeyaan wax-ka-beddelka la soo bandhigay, markaas Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa soo habayn doona shirkaas sidii uu u qabsoomi lahaa.

   Wax-ka-beddelkaasi wuxuu dhaqan gelayaa marka saddex-meeloodow-laba meelood waddamada jooga shirka ay u codeeyaan wax-ka-beddelka. Markaas kadib, ayuu Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay hor dhigi doonaa Golaha Guud si ay u ansixiyaan.

2. Marka wax-ka-beddelkaas uu Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ansixiyo, wuxuu noqonayaa sharci 30 cisho kaddib marka saddex-meeloodow laba dhammaan dalalka Golaha Guud ku jiraa ay aqbalaan.

   Intaas kaddib, dal kasta oo ansixiya wax-ka-beddelkaas, wuxuu sharci dhaqan gala ku noqon doonaa 30 cisho kaddib marka ay ansixiyeen.

   Wax-ka-beddelkani wuxuu sharci ku noqon doonaa keliya dalalka aqbalay ee ansixiyey.

3. Haddii wax-ka-beddelka la soo gudbiyey ku saabsan yahay warbixin soo gudbinta, ama guddida, markaas 30 cisho kaddib marka ay saddex-meeloodow-laba dalalka oo dhammi ansixiyaan, wuxuu sharci ku noqon doonaa dalalka oo dhan, haddii ay wax-ka-beddel oggolaadeen iyo haddii ay diideenba.

Qodobka 48aad

Heshiis ka bixid

Dalkii doonaa dib ayuu isugu noqon karaa, oo odhan karaa heshiiskan ma oggolin. Si ay taas u soo gudbiyaan, waa inay warqad u soo qoraan Xoghayaha Guud ee Jamciyadda Quruumaha ka Dhexaysa. Waxana ka noqoshadoodu ay dhaqan gelaysaa Sannad kaddib markii ay soo gudbiyeen.

Qodobka 49aad

Heshiisku Waa inuu qaabab kala duwan oo la wada fahmi karo ku qornaadaa

Qoraalka heshiiskani waa inuu ku qornaadaa farta ay dadka aragga ka naafada ahi isticmaalaan iyo qaababka kale ee jiraba; taasoo looga jeedo inuu noqdo mid ay dadka oo dhammi akhriyi karaan fahmina karaan

Qodobka 50aad

Qoraalka Asalka ah ee heshiiskan

Heshiiskani wuxuu si siman oo asal ah ugu qornaan doonaa afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriisiga, Faransiiska, Ruushka iyo Isbaanishka.